



## **Macluumaadka Codaynta Dhammaan Dadka Sharciga ku Deggan Magaalada Burlington**

Caqdiga Magaalada Burlington, Xeerarka 1949, Lambarka 298

Maarso 2023, dadka deggan Burlington waxay u codeeyeen hirgalinta Codaynta Dhammaan Dadka Sharciga ku Deggan. Wuxuu ku gudbay taageero 68% ah. U oggolaanshaha dhammaan Dadka Sida Sharciga ah u Deggan inay codeeyaan doorashooyinkeena deegaanka waxay cod siinaysaa xubnaha bulshada ee ku nool, ka shaqeeya, canshuurtana siiya Burlington.

### **Waa maxay Codaynta Dhammaan Dadka Sharciga Ku Deggan?**

Codaynta Dhammaan Dadka Sharciga Ku Deggan waxay u oggolaataa dadka sida buuxda u deggan Burlington ee sida sharciga ah ugu nool halkan, laakiin aan haysan muwaadiniimada buuxda ee Maraykanka, inay codeeyaan doorashooyinka deegaanka. Tusaale ahaan, dadka kaarka cagaaran haysta, dadka haysta ruqsadda shaqo, ama dadka haysta Dadka Iyagoo Carruur ah Waddanka Yimi (DACA) dhammaantood waa qaar mutaystay inay isku diiwaangeliyan inay codeeyaan doorashooyinka deegaanka.

### **Waa maxay waxyaalahu Dadka Sharciga u Deggan ay mutaysteen inay u codeeyaan?**

Dadka Sharciga u Deggan ee aan ahayn muwaadiniin Maraykan ah, waxay mutaysteen inay u codeeyaan:

- Saraakiisha la Doorto ee Magaalada Burlington iyo Degmo Dugsiyeedka Burlington, sida Duqa Magaalada, Golaha Magaalada, Guddida Dugsiga, iyo saraakiish doorashada magaalada
- Wixii su'aalo la xiriira Magaalada Burlington ama Degmo Dugsiyeedka Burlington Dadka sharciga ku deggan ee aan ahayn muwaadiniin Maraykan ah looma oggola inay ka codeeyaan doorashooyinka gobolka ama fadaraalka.

### **Miyey cod-bixiyayaasha Sida Sharciga u Deggan u tartami karaan xafiisyada magaalada?**

Haa, marka deggane loo diiwaangeliyo inuu codeeyo, qofkaasi wuxuu u tartami karaan xafiisyada magaalada.

### **Sidee ayuu Qof Sharci ku Deggan iskugu diiwaangelin karaan inuu codeeyo?**

Isku diiwaangeli inaad codayso adigoo buuxinaya Foomka Diiwaangelinta Dhammaan Cod-bixiyayaasha Sharciga ku Deggan Magaalada Burlington (ka raadi khadka tooska halkan <https://www.burlingtonvt.gov/CT/Voter-Registration-Info>), kuna soo celinaya Xafiiska

Qasnajiga Karraaniga oo cinwaankiisu yahay 149 Church Street, Burlington, VT 05401. Dadka sharciga ku deggan sidoo kale waxay isku diiwaangelin karaan inay ka codeeyaan goob-doorasheedka u dhaw Maalinta Doorashada.

### **Su'aalo?**

Ka wac xafiiska Khasnajiga Karaaniga Burlington 802-865-7000 ama iimayl ugu dir [burlingtontownclerk@burlingtonvt.gov](mailto:burlingtontownclerk@burlingtonvt.gov)